# ILMAHAAGU WAXA UU WAXBARASHADA KA HORAYSA DUGSIGA HOOSE BILAABI DOONAA XILLIGA DAYRTA

WAXBARASHADA KA HORAYSA DUGSIGA HOOSE WAXAY BILAABAN DOONTAA KHAMIISTA 13 AGOOSTO 2026 WAXAYNA DHAMMAAN DOONTAA JIMCAHA 4 JUUN 2027.

**Salaaman, ardayda mustaqbalka ee waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose!**

Waxaad waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose bilaabi doontaan xilliga dayrta. Inta lagu jiro geediga waxbarashada, waxaad la ciyaari doontaa, la sahamin doontaa oo aad si wadajir ah wax ula baran doontaa carruur kale. Sidoo kale way fiicnaan doontaa in lagaa dhagaysto waxyaabaha aad hore u taqaanay sida loo sameeyo iyo waxaad jeclaan lahayd inaad barato.

Aan ku kulano waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose!



# Ku soo dhawoow waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose!

Ilmahaagu waxa uu waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose bilaabi doonaa xilliga dayrta. Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waa hannaan nidaamsan oo hadaf ku wajahan, kaas oo ku salaysan manhaj. Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxay ka kooban tahay barashada cutubyo leh baaxado kala duwan iyo hababka hirgelinta kuwaas oo tixgelinaya danaha carruurta. Intay socoto waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose, ilmahaagu wuu ciyaari karaa, wax sahmin karaa, noqon karaa mid jir ahaan u firfircoon oo si wadajir ah waxyaabo cusub ula baran karaa carruurta kale.

Hawlaha kala duwan waxay carruurta siiyaan khibrado waxayna xoojiyaan dhiiragelinta waxbarashadooda. Wakhti ayaa loo qoondeeyaa ciyaar maalinle ah oo ku saabsan waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose. Ciyaarta iyo khibradaha waxbarasho ee wanaagsan waxay xoojiyaan xirfadaha shucuureed iyo saaxiibtinimada carruurta.

Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waa waajib. Waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxa la qabanqaabiyaa maalmaha shaqada ee dugsiga muddo afar saacadood maalintii. Waxbarashadu waa lacag la'aan waxaana ku jira cunto diirran oo maalinle ah. Marka laga soo tago waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose, caruurtu waxay ka qaybqaadan karaan waxbarashada carruurnimada hore ee kabka ah, taas oo ku xiran khidmad. Baahida aad u qabto waxbarashada

carruurnimada hore ee kabka ah waxaad ku muujin kartaa marka laguu diiwaangelinayo waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose.

## Ikhtiyaarada luqadda ee waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose

Koox kasta oo ka mid ah waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxay wax bartaan wax ku saabsan luqadaha iyo dhaqamada ay kooxdu matasho. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ikhtiyaarada luqadda ee laga helo waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose: https://www.vantaa.fi/en/education-and-learning/pre-primary-education/bilingual-pre-primary-education.

## Xasuusnow inaad canugaaga u diiwaangeliso waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose inta u dhaxeyso 7–30 Janaayo 2026!

Waxaad ilmahaaga uga diwaangelin kartaa si elektaroonig ah adigoo adeegsanaya adeega VaSa ama waxaad arji ku dhaafi kartaa xarunta xannaanada maalinta Haddii ilmahaagu u baahan yahay waxbarashada carruurnimada hore ah ee kaabista leh marka lagu daro waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose, waxaad ku codsan kartaa isla foomka codsiga. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan goobaha waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose iyo qoondaynta boosaska waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose ka heli kartaa barta https://www.vantaa.fi/en/education-and-learning/pre-primary-education. Go'aamada waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose waxaa lagu dhejin doonaa adeegga VaSa ugu dambayntii toddobaadka 14aad.

## Kaalay wax badan baro oona arag dhismaha!

Munaasabadaha hordhaca ah ee qoysaska ayaa lagu qaban doonaa goobaha waxbarashada ka horaysa dugsiga hoose bisha Maajo. Waaxda ayaa waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ogeysiin doona munaasabadaha.